# Dhiirigelinta iyo Is dhexgalka wanaagsan

Hagahan gaabani waxa uu bixinayaa macluumaad ku saabsan sida loola yeesho xidhiidh wanaagsan dadka kale



NEIGHBOURHOOD
Empowerment Team

lakualanka dad aadan aqoonin waxay sababi kartaa  inaad ka cabsatid maadaama laga yaabo in aadan garanaynin waxa aad kala kulmi karto. Waxa aynu hoos u dhigi karnaa cabsidan inagoo aad u baranayna dadka noocyadooda kala duwan iyo barashada waayoaragnimadda dadka.

Macluumaadka ku saabsan calaamadaha kacsanaanta iyo isku buuqa keena waxay kaa caawin karaan inaad dareento inaad u diyaarsantahey inaad xaaladan oo kale gasho. iyo sidoo kale xilli hore in xal loo helo xaalad dhibaato ah.



Istaratiijiyadaha iyo macluumaadka ku jira hagahan ayaad isticmaali kartaa marka aad la hadlayso dadka aanad aqoon iyo kuwa aad rumaysantahay in ficilladooda aan la saadaalin karin.

## Xeeladdaha ugu wanaagsan ee lagu dhiirigeliyo isdhexgalka togan waa in la isticmaalo **xirfadaha dhegeysiga firfircoon** iyo **dhibir sanaan.**

Guud ahaan hadaan dadka ula dhaqano si wanaagsan waxay tusaysaa bilowga is dhexgal wanaagsan

Waxaa muhiim ah in la ogsoonaado in qof kasta uu leeyahay taariikh u gaar ah, waxaa laga yaabaa in qaybo ka mida yihiin welwel iyo jaahwareer horay ula soo darsay.

Waa in aan sidoo kale xasuusannaa in aan galno xaalado male- awaalkeena iyo fikradaheena khaldani ay saameyn karaan is-dhexgalkeena dadka kale.



## Markaad la kulanto dad laga yaabo inay yihiin kuwa **kacsan** ama **xanaaqsan**

- **Ogow waxa kiciya:** waxaa jira waxyaabo aadan awoodin inaad aragto oo qofka kicin kara, kana dhigi kara mid kacsan oo xanaaqsan.
- **Ogsonow calaamadaha walaaca:** waxaa jiri kara calaamado digniin hore ah oo aad arki karto sida dulqaad la,aan, wareer, degenaansho la'aan, xawli ku socosho, ciddi-qaniin, sii daynta shucuur xooggan ama qaylo, qabashada ama qaniinidda maqaarka ama marada.





## Waxyaabaha sababa ama keena **walaaca**

Ogsoonidda kuwaan waxay kaa caawin karaan inaad ka fogaato meelaha aad ka dareento xaalad cabsi ama la tacaamulidda xaalad kacsan.

- Qofku wuxuu **sii daynayaa xanaaq iyo ama niyad jab**; kuwani waxay dhismi karaan waqti dheer iyo kahor is dhexgaka.
- Waxay **dareensanyihiin inay luminayaan kontorolka** iyo inay isku dayayaan inay dib u helaan
- **Aarsi;** ladagalanka  dulmiga dhabta ah sida cadalad darada ama in si xun loola dhaqmo.



- **Isticmaal farsamooyinka wargalinta wax ku oolka ah**
  - Weydii magaca qofka oo inta badan isticmaal, magacaagana usheeg
  - Dhegayso waxa qofku sheegaayo odoo dhageysanaya danaha guud
  - Diiradda saar dareenka qofka
  - Isticmaal xirfadaha dhageysiga firfircoon
  - Sii qofka waqti iyo fursad uu rayigiisa ku muujiyo
  - Caddee/waadixi oo su'aalo weydii
  - Muuji murugo adoo adeegsanaya hadalada wajiga iyo faallooyinka sida "taasi waxay u egtahay xaalad adag"
  - U soo koob hadallada qofka si aad u muujiso in aad maqashay iyo inaad fahamtay waxa uu qofku sheegayo
  - Iska ilaali ama iska ilaali su'aalaha adag, qofka waxaa laga yaabaa inuu isku dayo inuu abuuro halgan awoodeed

- **Soo gunaanad**
  - Halkii aad qofka u sheegi lahayd waxuu samayn lahaa, sii doorasho
  - Weydii talooyin
  - Inaad hesho waafaqsanaan "haa" sida aad talo u soo jeediso
  - Raadi wax yar oo ay kugu raacsan yihiin, taasi waxay suura galinaysa 'wada shaqeyn' maskaxeed
  - Go,aanso waxa laga gor-gortami karo iyo waxa aan laga gorgortami karin.

**Xusuusnow:** wax la qabashada dadka qaba **daryeel iyo walaac dhab ah** in ay marin karto waddo dheer oo lagu xaqiijinayo in xaaladdu ay deganaato isla markaana ay tahay mid **wanaagsan.**

## Talooyinka is dhexgalka wanaagsan

- **Ka fikir xaaladdaada cadiifadeed.** Naftaada si daji intaadan la kulmin shaqsiga.
- **Ogsoonow hareerahaaga.** Ma jiraan dad kale oo ku taageeri kara? Ma jiraan waxyaabo kugu xeeran oo hub ahaan loo adeegsan karo? Ma leedahay badbaado? Ma laga yaabaa in mowqifkaagu noqon karo mid qofka kale ka dhiga mid xayiran?
- **Fiiri oo udhaqan si macquul ah oo aan halis ahayn**
    - Ixtiraam qofka shakhsi ahaan
    - Isticmaal cod dabacsan, oo joogto ah
    - kayeel   wajigaaga mid dhexdhexaad ah
    - Gacmahaaga  dhig  hortaada , is furfur  iyo dulqaadna hakaa muuqdo .
    - Iska ilaali inaad aad u dhaqaaqdo, dhibsato ama aad farta fiiqid
- **Xakamee jawaabtaada.** Dabeecadaha iyo falcelinta waxay qayb ka yihiin dejinta xaaladdaha.



**Xaaladaha Degdegga ah 9-1-1**

**Xaaladaha caadiga ah line 780-423-4567**

**Online at Edmontonpolice.ca**

**Edmonton Police Service App**

NEIGHBOURHOOD
Empowerment Team

Wixii faah faahin dheeraad ah ka akhriso: **NET@edmonton.ca**

NET waa shirkad iskaashi la leh Booliska Edmonton, Magaalada Edmonton, Xarunta Qoyska iyo Wadada Midoobay ee Gobolka Caasimadda Alberta.

La Daabacay December 2019
Somali